# Waa Maxay Magacaabista Qaataha?

Magacaabista qaataha waxay u sahlaysaa hantida dhaqaale in geerida kadib lagu wareejiyo qofka ama dadka aad doorato. Dejinta magacaabista qaataha waxay gacan ka gaysan kartaa in laga fogaado maxkamad ama qofkale inay go'aamiyaan cidda qaadanayso hantida dhaqaale kadib marka aad dhimato.

- Waxaa muhiim ah inaad xaqiijiso in magacaabidaada qaataha ay cusboonaysiisan tahay ayna waafaqsan tahay rabitaanadaada ku saabsan cidda aad rabto inay qaadato hantidaada dhaqaale kadib marka aad dhimato.

### Maxaa ay u tahay fikrad wanaagsan inaad eegto oo aad cusboonaysiiso magacaabistaada qaataha?

Marka magacaabista qaataha aanay waafaqsanayn rabitaanadaada ku saabsan cidda aad rabto inay qaadato hantidaada dhaqaale kadib marka aad dhimato, dadka aad jeceshahay ayaa looga tagaa inay maraan saad adag xilli lagu jiro wakhti murugo iyo isbeddel nolol oo aad u adag.

Wakhtiyo badan, magacaabista qaataha waxaa la dejiyaa xilli hore oo nolosha ah weligeedna lama cusboonaysiiyo. Tani waxay keeni kartaa waalid ama lammaane hore, tusaale ahaan, inay qaataan hanti aad rabto inuu qaato qofkale.

- Qofka qaata hantida wuxuu go'aansan karaa inuu haysto oo uusan ku wareejin qofki aad rabtay inuu hantida qaato.
- Xitaa haddii qofkaasi oggolaado inuu wareejiyo hantida, waxaa jiri kara canshuuro la xiriira wareejinta taasoo yarayn karta qadarka ama qiimaha hantida.

### Waa maxay nooca sheeyaasha ay yeelan karaan magacaabitaanada qaatayaasha sideese u qoondaynaysaa?

Waa fikrad wanaagsan inaad samayso liiska dhammaan hantidaada dhaqaale si aad u go'aamiso kuwa aad u qoondayn karto qaataha(qaatayaasha) dookhaaga ah. Hantida waxaa ku jiri kara:

- Koontooyinka maaliyadeed sida 401K, hawlgabka, IRA, gunnada, koontada suuqa lacagta, iyo koontooyinka kale ee dillaalka waxay yeelan karaan magacaabista qaatayaasha.
- Koontooyinka bangiyada sida koontooyinka maalinlaha loo isticmaalo iyo kuwa keydka waxay sidoo kale yeelan karaan qaatayaal.
  Bangiyada waxay mararka qaar arrintan ugu yeeraan "lagu bixin karo magacaabista dhimashada."
- Waxaad sidoo kale dad u magacaabi kartaa siyaasadaha caymiska nolosha.

Dhanka dambe ee xaashidan waxaa ku jirto shax kaa caawinayso inaad bilowdo.

### Miyaad u baahan tahay inaad qaate u magacowdo koontooyinka bangi ee la wada leeyahay?

Ma ahan daruuri. Lahaanshaha koontada bangi ee la wada leeyahay waxay ka dhaxaysaa dadka wada-leh.

- Marka aad dhimato, lahaanshaha buuxa ee koontada bangi ee la wada leeyahay waxay ku baaqi ahaan doontaa mulkiilaha nool mana u gudbi doonto qaataha(qaatayaasha) liiska ku jira inta mulkiile wax ka leh uu nool yahay.
- Laakiin, haddii aad rabto lacagaha inay u gudbaan qof ama dad gaar ah kadib marka dhammaan mulkiilayaasha wada-leh ay dhintaan, markaa waa fikrad wanaagsan inaad qorto qaataha(qaatayaasha).

# Xaashida Magacaabista Qaataha

| NOOCA KOONTADA | BANGIGA AMA SHIRKADDA | QAATAHA LOO MAGACAABAY | XIRIIRKA IDIN KA DHEXEEYO | MARKI UGU DAMBAYSAY EE LA CUSBOONAYSIIYAY |
|---|---|---|---|---|
| (Tusaale ahaan) 401K | Fidelity | Joe Smith | Wiilkayga | 01/01/2025 |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |

- Waxaad ku dari kartaa ama cusboonaysiin kartaa magacaabista qaataha adigoo adeegsanaya bartaada onlaynka ama adigoo la xiriiraya shirkadda maamusha koontada.
- Haddii aad dad badan u magacowdo hal koonto, waxaad qoondayn kartaa boqolkiiba inta lacagaha uu ka heli doono qaate kasta.
- Haddii aad leedahay Power of Attorney (Awood Qareen), waxay sidoo kale awood u leeyihiin inay sidan adiga kuu sameeyaan.

*Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan magacaabista qaataha ama sida loo sameeyo isbeddeladaan, Cancer Legal Care (Daryeelka Sharciga ee Kansarka) ayaa ku siin kara hagitaan bilaash ah. Nagala soo xiriir 651-917-9000 ama [www.cancerlegalcare.org](http://www.cancerlegalcare.org).*